



Seattle
Public
Utilities



King County

Noqo RainWise

Maaree biyaha roobka ee gurigaaga

Waa maxay
dhibaatadu?

Roob kasta oo da'a, roobku wuxuu wasaqda ka soo qaadaa saqafyadeena, wadooyinka la maro iyo meelaha kale ee adag dushooda isaga oo gala webiyada yar yar ee degaankeena, Lake Washington and Puget Sound. Inta lagu jiro roobabka waaweyn, heerka "biyaha roobkan" wuxuu keeni karaa buux-dhaafka bulaacada, isaga oo nabaad guurin kara meelaha taagaga ah iyo iyo hareeraha dooxyada. Beeraha roobka ku baxa iyo taangiyada biyaha lagu keydiyo 'cisterns' waxaad caawimaad ka geysan karaan maareynta biyahan roobka marka aad wax caawiso.

Tallaabooyin lagu noqonayo RainWise

Booqo www.rainwise.seattle.gov

1. **Fiiri u qalmitaankaaga** adiga cinwaankaaga ku qoraya si aad u ogaato waxa ka soconaya hantidaada iyo haddii aad heli karto lacag dib la iskugu soo celinayo 'rebate'.
2. **Hel dalabyo** ka socda qandaraaslayaasha kuwaasi oo laga helayo qaybta ay ku qoran tahay Hel Qandaraaslayaal "Find a Contractor" ee laga helayo website-ka. Dooro qandaraaslaahaaga.
3. **Qandaraaslaahaaga ayaa kuu sameyn doona jadwal ah baaritaan hore 'pre-inspection' ka dibna** sameyn doonaa wax rakibaada.
4. **Qandaraaslaahaaga ayaa qorsheyn doona kormeer kama dambeys ah oo la sameeyo.** Qofka fiiranaya RainWise ayaa xaqiijin doon in rakibaadaada si sax ah loo sameeyay.
5. **Hel lacagtaada dib la iskugu soo celinayo 'rebate'!** Soo gudbi xirmadaada lacagta dib la iskugu soo celinayo 'rebate package' isla markaana lacagtaada dib la iskugu soo celinayo 'rebate' ku hel muddo 6-8 toddobaad gudahood ah.

Wixii
macluumaad ee
dheeraad ah booqo

www.rainwise.seattle.gov

Su'aalaha? Email u dir rainwise@seattle.gov
ama wac Khadka Beerta 'Garden Hotline' ee
206-633-0224.



Qandaraaslayaasha RainWise waxay dejiyaan naqshada beeraha roobka ku baxa ee ku habboon baahiyaha gaarka ah ee goob kasta.



LACAGTAADA DIB LA ISKUGU SOO
CELINAYO 'REBATE' ee

RainWise

waxay bixin doontaa lacagta beeraha
roobka ku baxa iyo taangiyada biyaha lagu
keydiyo 'cisterns'

Barnaamijka RainWise wuxuu bixiyaa lacagaha dib la iskugu soo celinayo 'rebates' oo lagu daboolo inta badan ama dhammaan kharashyada rakibaada taangiyada biyaha lagu keydiyo 'cisterns' iyo beeraha roobka ku baxa ee ku yaala hantidaada. Si aad u hesho lacagta dib la iskugu soo celinayo 'rebate', waa in aad u ku nooshahay meel ay ka jirto buux-dhaafka wasakhda bulaacadaha ee isku jira. Waxaanu kaa caawin doonaan ga'aaminta haddii hantidaadu u qalanto. **Qiyaasta lacagta dib la iskugu soo celinayo 'rebate' waxay ahayd \$4,000.**

Taangiga biyaha lagu keydiyo 'cistern',

beerta roobka ku baxda ama labodoodaba... Sidee baad u noqon doontaa

RainWise?

Sidee bay taangiga biyaha lagu keydiyo 'cistern' ee RainWise u shaqeeyaa?




Taangiga biyaha lagu keydiyo 'cistern' waa weel weyn oo dhulka kor uga kacsan oo lagu ururiyo biyaha ka imaanaya saqafka. Waa sida foostada biyaha oo weyn waxayna qaadi kartaa 200 ama ka badan oo gallons. Inta lagu jiro xilliga jiilaalka, taangiyada biyaha lagu keydiyo 'cisterns' ee RainWise waxay ururiyaan biyaha waxayna si tartiib ah ugu sii daayaan nidaamka bulaacada. Inta lagu jiro xagaaga, biyaha ayaa la ururin karaa isla markaana loo isticmaali karaa in wax lagu waraabiyo



Taangiyada biyaha lagu keydiyo 'cisterns' waxay ku yimaadaan iyaga oo leh qaabab kala duwan, cabbir iyo midabyo.

Taangiga biyaha lagu keydiyo 'cistern'



biyo

BEERTA ROOBKA KU BAXDA

Taangiyada biyaha lagu keydiyo 'cisterns' ee RainWise waxay si gaar ah ugu qalabaysan yihiin in ay biyaha u oggolaadaan in ay si tartiib u soo dareeraan inta lagu jiro bilaha jiilaalka. Tani waxay xaqiijinaysaa in taangiga biyaha lagu keydiyo 'cistern' uu maran yahay ka dib marka roob kasta oo weyni da'o isla markaana ay diyaar yihiin in roob dheeraad ah laga buuxiyo.

haraaga dhirta

Isku darka beerta roobka ku baxda iyo carrada

Dhulka
hadda jira

Biyaha ayaa si
tartiib ah u gala dhulka

Sidee bay beeraha roobka ku baxaa RainWise u shaqeeyaan?

Beerta roobka **ku baxda** waa meel aan qoto dheer lahayn ee ka kooban carro jilicsan iyo dhir kala duwan. Waxay biyaha ka soo ururisa dhuunta saqafka ee biyuhu hoos u raacaan 'downspout' iyada oo si tartiib ah u qooyaan dhulka. Carrada iyo dhirtu waxay u dhaqmaan sidii wax sifeeye dabiici ah, iyaga oo nadiifinaya biyaha ka hor inta aanay galin dhulka ama meelaha biyuhu maraan ee u dhow.



Beeraha roobka ku baxa waxaa ku jiri kara dhir kala duwan iyo naqshadeynta aad doorato.

Qandaraaslaha **RainWise** ayaa kaa caawin doona in aad go'aansato mida xalka ah ee sida wanaagsan ugu shaqaynaya hantidaada, kharashka iyo tirada lacageed ee lacagtaada dib la iskugu soo celinayo 'rebate' ee suurtagalka ah.



Seattle
Public
Utilities



King County

Isaga oo kaala shaqayn doona in aad maareyso biyaha roobka ee guriga.

www.rainwise.seattle.gov